MAINE PAID FAMILY & MEDICAL LEAVE

**Su'aalaha Badanaa La Iska Weydiiyo (FAQ)**
**Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee**
**Mushaharka La Qaato (PFML)**
**Cayminta Ikhtiyaariga ah ee Shakhsiyaadka Iska u Shaqaysta iyo Dawladaha Qabiileed**

**Fiiro gaar ah:** Su'aalahan Badanka la Iswaydiiyo waxa loogu talogalay inay ka caawiyaan shakhsiyaadka iska u shaqaysta iyo dawladaha qabiileed inay si wacan u fahmaan xuquuqdooda iyo waajibaadka laga rabo iyo inay adeegsadaan Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato ee Maine. Dukumintigani waxa uu bixiyaa hagitaan balse ma beddelo awoodda Sharciga ama Xeerarka Barnaamijka. Macluumaadka ku jira hagitaankan waa kuwo la beddeli karo. Booqo www.maine.gov/paidleave si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeyey.

Cayminta Ikhiyaariga ah waxa heli kara:

- Shakhsiyaadka iska u shaqaysta ee deggan Gobolka Maine, iyo
- Dawladaha qabiileed ee raba inay caymiyaan shaqaalahooga.

## Cayminta Ikhtiyaariga ah ee Shakhsiyaadka Iska u Shaqaysta

### 1. Sideen ku dooran karaa caymin markaan ahay shakhsi iskii u shaqaysta?

Si aad u doorato caymin, waxa waajib ah inaad:

- Qof deggan Maine.
- Ka xeraysato ogaysiis doorashada Waaxda adigoo u maraya Barta Lacag-isku-darista Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine.
- Bixiso nuqul ah cashuur-celintaada fadaraalka ee sanadkii hore.

### 2. Muddo intee leeg ayuu soconayaa cayminta la doorto?

Cayminta ikhtiyaariga ah waxa waajib ah marka hore inay socoto ugu yaraan muddo saddex sano ah waxaana la cusboonaysiiyaa wakhtiga hore wixii ka dambeeya kolba hal sano.

### 3. Goorma ayay cayminta la doortaa dhaqangashaa?

Cayminta ikhtiyaariga ah ee la ansixiyey waxay dhaqangal noqota maalinta koowaad ee saddexda bilood ee u horreeya ee ka dambeeya doorashada.

**4. Miyuu shakhsiga iskii u shaqaystaa codsan karaa gunnooyinka kadib doorashada cayminta?**

Haa, way dhici kartaa in shakhsiga iskii u shaqaystaa uu codsado gunnooyinka kadib taariikhda dhaqangalka caymintiisa ama bilawga gunnooyinka, kii la rabo ha dambeeyee. Gunnooyinka waxa la muddeeyey inay bilaabmaan Maajo 1, 2026.

**5. Sidee mushaharrada loo go'aamiyaa shakhsiyaadka iska u shaqaysta?**

Shakhsiyaadka iska u shaqaysta marka la eego, mushaharradu waxay ku salaysan yihiin dakhliga saafiga ah ee ay ka helaan shaqooyinka ay qabtaan, sida loogu tabiyo Adeegyada Dakhliga Maine (Maine Revenue Services) ee cashuur-celinta dakhliga shakhsi ahaaneed ee sanadkii hore. Mushaharrada saddexdii bilood waxa lagu go'aamiyaa in 4 loo qaybiyo dakhliga saafiga ah ee cashuur-celinta sanadkii hore. Nuqulada cashuur-celinta waxa waajib ah in si sanadle ah loogu gudbiyo Waaxda ugu dambayn Juunyo 1.

**6. Miyey tahay in shakhsiyaadka iska u shaqaystaa ay gaaraan heer mushahar oo ugu yar?**

Haa, shakhsiyaadka iska u shaqaystaa waxa waajib ah inay gaaraan heer mushahar oo ugu yar marka la eego shakhsiyaadka la caymiyey si ay u mutaystaan gunnooyinka fasaxa qoyska iyo caafimaadka ee mushaharka la qaato (PFML) iyagoo 6 jeer baradhaafinaya ta Celceliska Toddobaadkii ee Mushaharka Gobolka ee dakhliga saafiga ah ee lagu tabiyey cashuur-celintii sanadkii hore.

**7. Ka waran haddaan rabo inaan ka baxo cayminta?**

Waaxdu waxay ogaysiin doontaa dhammaan shakhsiyaadka iska u shaqaysta ee ku jira cayminta ikhtiyaariga ah taariikhda uu dhammaanayo wakhtiga caymintoodu ugu yaraan 60 maalmood kahor taariikhda dhammaanshaha. Tani waxay bilaabmi doontaa wakhtiga cayminta laga baxayo.

**8. Ka waran haddii aan kaga bixi waayo muddada la sheegay?**

Haddii aad kaga bixi waydi 60 ka maalmood gudahood kahor dhammaadka caymintaada, caymintu si otomaatig ah ayey isku cusboonaysiin doontaa muddo hal sano oo dheeraad ah.

**9. Miyuu shakhsi is u shaqaystaa ka bixi karaa hadduusan markaa ahayn qof is u shaqaysta?**

Haa, haddii shakhsi is u shaqaystaa uusan ahayn mid markaa is u shaqaysta, wuu ka bixin karaa cayminta 30 maalmood gudahood laga bilaabo marka uu iska beddelay xaalada is-u-shaqaysiga isagoo ku wargelinaya Waaxda isagoo u maraya barta Fasaxa Mushaharka la Qaato ee Maine.

**10. Waa goorma taariikhda dhaqangalka ka bixistu?**

Taariikhda dhaqangalka ee ka bixistu waa 30 maalmood kadib marka ogaysiiska ka bixista la xereeyo, ama taariikhda Waaxdu ansixisay ka bixista, kii la rabo ha dambeeyee.

**11. Miyaan dooran karaa caymin mar labaad kadib ka bixista?**

Haa, haddii shakhsi is u shaqaystaa uusan cusboonaysiisan ama ka baxo cayminta, wuu dooran karaa caymin mar labaad. Cayminta cusub waxay ku bilaabmi doontaa muddo saddex sano ah bilawga.

**<u>Cayminta Ikhtiyaariga ah ee Dawladaha Qabiileed</u>**

**12. Sidee ayey dawladaha qabiileed u dooran karaan cayminta?**

Dawlad qabiileed waxay ugu doori kartaa cayminta shaqaalaheega iyadoo ka xeraynaysa ogaysiis doorasho Waaxda iyadoo u maraysa Barta Lacag-isku-darka Fasaxa Mushaharka la Qaato ee Maine. Cayminta ikhtiyaariga ah waxa waajib ah marka hore inay socoto ugu yaraan muddo saddex sano ah waxaana la cusboonaysiiyaa wakhtiga hore wixii ka dambeeya kolba hal sano.

**13. Haddii dawlad qabiileed doorato caymin, arrintaasi maxay ka dhigan tahay?**

Marka dawlad qabiileed ay doorato caymin, waxay ka dhigan tahay dawladda qabiileed oo loo-shaqeeye ah inay dooratay inay caymin siiso dhammaan shaqaalaheega gudaha ururka. Dawladda qabiileed waxay noqon "loo-shaqeeye", shaqaalaha dawladda qabiileedna waxay noqon "shaqaale la caymiyey" marka la eego ujeedooyinka dhammaan xeerarka kale ee barnaamijka. Qofka Shaqaalaha dawladda qabiileed ka tirsan ma oggolaan karo ama diidi karo barnaamijka.

**14. Sidee ayey dawladaha qabiileed u tabiyaan mushaharka?**

Dawladaha qabiileed ee doorta caymis waxa waajib ah inay u gudbiyaan **warbixinaha lacag-isku-darista saddexdii bilood** Waaxda iyagoo u maraya Barta Fasaxa Qoyska ee Mushaharka la Qaato iyagoo isticmaalaya hannaanka caadiga ah ee loo-shaqeeye barnaamijka ah.

**15. Ka waran haddaan rabo inaan ka baxo cayminta?**

Waaxdu waxay ogaysiin doontaa dhammaan dawladaha qabiileed ee la doortay taariikhda uu dhammaanayo wakhtiga caymintoodu ugu yaraan 60 maalmood kahor taariikhda dhammaanshaha. Tani waxay bilaabmi doontaa wakhtiga cayminta laga baxayo.

**16. Ka waran haddii aan kaga bixi waayo muddada la sheegay?**

Haddii aad kaga bixi waydi 60 ka maalmood gudahood kahor dhammaadka caymintaada, caymintu si otomaatig ah ayey isku cusboonaysiin doontaa muddo hal sano oo dheeraad ah.

**17. Miyey dawladda qabiileed ka bixi kartaa cayminta?**

Haa, dawlad qabiileed way ka bixi kartaa cayminta iyadoo xeraynaysa foomka ka bixista iyadoo u maraysa Barta Fasaxa Qoyska ee Mushaharka la Qaato. Ka bixista waxa waajib ah in lagu gudbiyo 30 maalmood gudahood kadib dhammaadka muddada cayminta.

**18. Miyaan dooran karaa caymin mar labaad kadib ka bixista?**

Haa, dawlad qabiileed aysan cusboonaysiisan ama ka baxdo cayminta, waxay dooran kartaa caymin mar labaad. Cayminta cusub waxay ku bilaabmi doontaa muddo saddex sano ah bilawga.